

## Is-nidaamis (Scabies)

Gacaliye Waalid/daryeele:

Arrin la xiriirta jirrada is-nidaamis ayaa lagu arkay lagana daweyey cunugaaga dugsigiisa. Cudurrada sida hagaagsan loo daweyo innaba ma yeeshaan is-qabadiin. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaan doonaynaa inaad la socotaan waxyaabaha soo socda:

<b>Sababta (Cause)</b>	Is-nidaamisku waa hujuun maqaarka uuna sababo cayayaan yar yar ee dhiigga jaqa. Hujuunkaasi ayaa dhaca marka dheddiga cayayaankaasi uu qodo maqaarka hoostiisa suu ukumo ugu dhalo. Maalin kasta waxay dhigtaa in yar intii dhawr toddobaad ah, sida bandanna meelaha jirku ka laalaabmo ee gacmaha u wareegsan, cumaacunta, kilkilaha iyo faraha dhexdooda. Meelaha kale ayey ka mid noqon kartaa suxullada, jilbaha, wareega cumaacunta.
<b>Calaamadaha/ifa faalo (Symptoms)</b>	Cun-cun ay sababto qodidda cayayaan ee maqaarka. Firiiric nabarro yar yar, ama nabar biyo galaan. Mararka qaarkood waxaad kaliya arki kartaa meelo xoq-xoqan. Cunugaagu wuxuu cun cunkiisu badanayaa habeenkii. Itching, <b>Cun-cunka weheliya is-nidaamiska wuxuu sii socon karaa dhawr asbuuc xataa dawaynta kaddib.</b>
<b>Faafidda (Spread)</b>	Is-nidaamiska wuxuu ku fidaa taabasho maqaarka ama la wadaagid waxyaabaha lagu seexdo, shukumaannada, dhar uu isticmaalay qof is-nidaamis qaba.
<b>Xilliga ukumuhuu ku dilaacaan (Incubation Period)</b>	Waxay qaadataa 2 ilaa 6 asbuuc inta qofka uu uga dhacay iyo inta calaamaduhu ku muuqdaan. Cunuguna waa qaadiin karaa cudurka inta aan firiiricu ka soo bixin.
<b>Ogaanta &amp; Daweynta (Diagnosis/Treatment)</b>	If you suspect scabies you should call your healthcare provider. Dawayntu waa kareemo la isu qoro oogadana la mariyo.
<b>Karantiil (Exclusion)</b>	Karantiilku wuxuu jirayaa ilaa 24 saac kaddib marka dawayntu bilaabato.
<b>Ka hortag (Prevention)</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>▪ Xilliga dawaynta, ku dhaq biyo kulul, kuna rid qallajiso kulul shayada la isticmaalay 48 saac ee la soo dhaafay. Waxyaabaha la dhaqayo tusaale ahaan waxaa ka mid ah hoos-gashiyada (underwear), bajaamaha, gogosha sariirta iyo shukumaannada. Shayada aan la dhaqi karan waa in lagu xiraa kolay balaastig ka samaysan muddo asbuuc ah.</li><li>▪ Adeegso Qalabka Nadiifinta Roogagga (Vacuum upholstered furniture and carpeting). <b>HA ISTICMAALIN</b> Kimikada wax lagu buufiyo (DO NOT use insecticide sprays).</li></ul>

La soo socodsii warbixinta Is-nidaamiska Xafiiska Caafimaadka Dugsiga. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka wac Waaxda Caafimaadka Bulshada Degmada Hennepin lam. (612) 543-5230.